## Casharka 34

1. Markii uu yimid Buur Siinaay dusheeda, Maxaa Ilaah siiyey reer binu Israa'iil?
-Wuxuu siiyey tobanka amarradood.

2. Maxaa Ilaah oo keliya u yahay Ilaaheenna?
-Waayo waxaa jira hal Ilaah.
-Waayo ma jiro Ilaah kale.

3. Maxaynaan u samaysanaynin wax Ilaah u eg, oo Ilaah inoo noqda?
-Waayo Ilaah waa Ruux.
-Waayo Ilaah sida dad oo kale maahan, ama xayawaanka oo kale, ama shimbiraha cirka oo kale.

4. Waa maxay sababta aynu u derajaynayno Magaa Ilaah?
-Waayo Magaca Rabbiga iyo Ilaah isku hal.
-Waayo Magaca Rabbiga iyo Ilaah waa isku mid.

5. Maxaynu u nasanaynaa hal maalin toddobaadkiiba?
-Waayo Ilaah wuxuu Ilaahw uxuu samada iyo dhulka ku uumay lix maalmood, oo wuxuu nastay maalintii toddobaad.

6. Waa maxay asbaabta aynu u derajaynayno Aabbaheen iyo hooyadeen?
-Waayo Ilaah wuxuu iyaga siiyey masuuliyadda ah inay ina koriyaan.

7. Marka la eego Ilaah aragtida Ilaah, haddii aynu qof nebcaanno, maxaa Ilaah u fasiranayaa?
-Waxay la mid tahay sida inaynu dilnay qofkaas.



8. Marka la eego sida Ilaah wax u arko, haddii aynu eegno qof kale, oo aynu doonayno inaynu qofkaas la seexanno, maxaynu samaynaynaa?
-Waynu macsiyeysanaynaa.

9. Markii la eego sida Ilaah wax u arko, haddii aynu jeclaysanno wax qof kale leeyahay, maxaynu samaynaynaa?
-Waxay la mid tahay sida inaynu ka xadnay.

10. Marka la eego sida Ilaah wax u arko, haddii aynu runta garanayno, balse aynaan sheegin, maxaynu samaynaynaa?
-Been baynu sheegaynaa.

11. Maxaynaan u doonaynin waxa dadka kale haystaan?
-Waayo Ilaah wuxuu siiyey alaabtaas iyada ah qof kale.

12. Haddii aynu adeecno amarrada Rabbiga oo dhan, mid maahane, muxuu Ilaah leeyahay?
-Ilaah wuxuu leeyahay waxay la mid tahay sida inaynu khilaafnay ama adeeci waynay amarradiisa.

13. Waa maxay ciqaabta jebinta tobanka amarradood?
-Waa dhimashada Ruuxa ee qofku ku dambaynayo harada dabka ah ama cadaabta.

14. Sidee bay amarrada Ilaah ula mid noqonayaan sida miraayd oo kale?
-

15. Muxuu Ilaah inoo siinayaa Amarradiisa?
-Inay na tusaan wasakhda, iyo qalbiga dembiga leh.

16. Waa kuma kan keliya ee nadiifiya qalibga dembiga iyo wasakhda badan?
-Ilaah.

-Ilaah wuxuu siiyey tobankiisii wasiyadooda Israa'iil.

-Waayo Ilaah ma uusan doonayn in reer binu Israa'iil illoobaan tobankiisa amarradood, Ilaah wuxuu ku qoray laba loox oodhagax ah.

-Ilaah wuxuu Muuse ugu yeeray inuu buurta kor u soo fuulo, si uu ku helo labada loox ee dhagaxa ah.

Bal aynu akhrinno Baxniintii 24:12

12-Markaasaa Rabbigu wuxuu Muuse ku yidhi, Bal kaalay oo buurta ii soo fuul, oo halkaas iska joog; oo waxaan ku siinayaa looxyada dhagaxa ah, iyo sharcigii iyo qaynuunnadii aan qoray, inaad iyaga bartid.

-Muuse wuxuu addeecay Ilaah, oo wuxuu aaday Buur Siinaay.

-Nin dhallinyaro ah oo lagu magacaabo Yashuuca ayaa soo raacay Muuse.

Bal aynu akhrinno Baxniintii 24:13-15 & 18

13-Kolkaasaa Muuse sara kacay, isaga iyo midiidinkiisii Yashuuca, oo Muuse wuxuu fuulay buurtii Ilaah.
14-Oo wuxuu odayaashii ku yidhi, Idinku halkkan noo jooga, ilaa aan mar kale idiin nimaadno, oo bal eega, wxaa idinla jooga Haaruun iyo Xuur; ku alla kii dacwo qaba, iyaga ha u yimaado.
15-Markaasaa muuse wuxuu fuulay buurtii, oo buurtiina waxaa qarisay daruur.
18-Markaasaa Muuse wuxuu galay buurta dusheeda, oo buurtuu fuulay; oo Muuse wuxuu buurtii fuushanaa afartan maalmood iyo afartan habeen.



-Markii Muuse gaaray Buur Siinaay dhaladeeda, Ilaah wuxuu isaga soo siiyey tobankii amarradood.

-Markii Ilaah Muuse siiyey tobanka amarradood, wuxuu Muuse ku amray inuu wax u sameeyo.

-Ilaah wuxuu Muuse ku amray inuu teendho u sameeyo Isaga.

Bal aynu akhrinno Baxniintii 25:8

8-Oo meel qoduus ah ha ii sameeyeen aan iyaga jdhex joogee?

-Waa maxay asbaabta Ilaah u amray in Muuse u dhiso isaga Teendho?

-Miyaa Ilaah u baahan yahay guri uu ku noolaado?
-Maya.

-Maxaa Ilaah aanu ugu baahnayn guri uu ku noolaado?

-Waayo Ilaah waa Ruux.

-Waayo Ilaah meel waliba ayuu joogaa wakhti waliba.

-Maxaa Ilaah Muuse ugu amray inuu teendho u sameeyo Isaga?

-Miyaad xusuusataa heshiiskii dhex-maray Ilaah iyo reer binu Israa'iil?

-Muxuu ahaa  heshiiskaas Ilaah la samaystay reer binu Israa'iil?

-Haddii ay reer binu Israa'iil wada dhowraan amarrada Ilaah oo dhan, Ilaah wuxuu u ballan-qaaday iyaga inuu barakadayn doono.

-Haddii reer binu Israa'iil ay addeecaan amarrada Ilaah, Ilaah wuxuu ballan-qaaday inuu barakadeeyo iyaga.

-Haddii reer binu Israa'iil ayan addeecin amarrada Ilaah oodhan, muxuu Ilaah ballan-qaaday inuu u sameeyo iyaga?

-Haddii reer binu Israa'iil aanay addeecin amarrada, Ilaah wuxuu ballan qaaday inuu ciqaabi doono iyaga.

-Miyaa haddaba reer binu Israa'iil awoodeen inay dhowraan ama addeecaan amarrada Rabbiga ood han?

-Maya.

-Miyaa Ilaah garanayaa in reer binu Israa'iil aanay awoodin inay dhowraan amarradiisa oo dhan?

-Haa.

-Waa maxay ciqaabta Ilaah u dejiyey jebinta mid ka mid ahamarradiisa?



-Waa dhimashada Harada dabka ah ah ee aan weligii demayn.

-Waxaa halkan yaalla waxa Ilaah Muuse ugu amray inuu sameeyo teendho:

-Waayo Ilaah wuxuu aad u jeclaa reer binu Israa'iil, mana uusan doonaynin inay ku dambeeyaan harada dabka ah ee holcaysa.

-Waayo Ilaah ma uusan doonayn in reer binu Israa'iil ku dhintaan harada dabka ah ee weligeed holcaysa, sababtaas aawadeed wuxuu iyaga u keenay nidaam ay ku baxsadaan.

-Muxuu ahaa nidaamka ama qaabka ay ku baxsan karaan reer binu Israa'iil ee Ilaah keenay?

-Markii qof dembaabo oo uu jebiyo amarrada Ilaah, waxay ahayd in reer binu Israa'iil yimaadaan teendhada shirka oo ay keenaan dhiig xoolaad.

-Muxuu Ilaah samaynayaa markii uu arko dhiigga xoolaad?

-Markii Ilaah arko dhiigga xayawaanka,  wuxuu joojinayaa ciqaabta shakhsga allabbariga bixinaya ilaa la helo qaab kale oo dembiga wax loogu bixiyo.

-Sidee baa Ilaah ka doonayaa in Muuse iyo reer binu Israa'iil ay u dhisaan teendhada shirka?

Bal aynu akhrinno Baxniintii 25:9

9-Waxaan ku tusi doono oo dhan, oo ah hannaanka taambuugga iyo hannaanka alaabtiisa oo dhan, waa inaad sidaas oo

kale u samaysaan.

-Sidee baa Ilaah ka doonayey Muuse iyo Israa'iil inay u dhisaan teendhada shirka?

-Waxay u dhisyaan sida Ilaaheennu yiri.

-Sidee baa Ilaah doonayey in doonnidii Nuux lood hiso?

-Waxaa la doonayey in loo dhiso isla sidii Ilaah doonayey.

-Isla sidii Ilaah Nuux ugu amray inuu doonni u dhiso, si la mid ah sidaas oo kale ayaa Ilaah ku amray in Muusr u dhiso taambuugga, iyadoo la raacayo wixii Ilaah yiri.

-Haddaba ninna Ilaah uma sheego karo sida ay tahay inaynu ugu nimaadno.

-Balse waa inaynu ugu nimaadno sida isagu uu inoo sheego inaan ugu nimaadno.

-Ilaah uguma iman karno hannaankeenna.

-Waa inaan Ilaah ugu nimaadno dariiqiisa oo keliya.

-Halkee baannu ku baranaynaa dariiqa Ilaah?
-Kitaabka Ilaah ee Baybalka.

-Waa maxay sheyadii Ilaah amray in lagu dhiso teendhada?

-Waxay isugu jireen maqaar xoolaad iyo waxyaabo laga sameeyey dhogorta riyaha.



-Dabeeto, Ilaah wuxuu Muuse ku amray inuu laba qol ka dhigo taambuuggga shirka.

-Kan kowaad waxaa Ilaah ugu yeeray meesha Qoduuska ah.

-Wuxuu ahaa qof Ilaah leeyahay.
-Dad aan badnayn ayaa halkaas loo oggolaa inay galaan.

-Qolka labaad waxaa loogu yeeri jiray Kan Qoduuska ah.
-Qolkaas waxaa iska lahaa Ilaah oo keliya.

-Hal qof oo keliya ayaa qolka labaad ama ugu qodduusan loo fasaxay inuu galo hal goor sannadkiiba.

-Taaisna waxaa sabab u ahaa in qoflkaas ay ku jirtay ammaanta Rabbiga.

-Haddii reer binu Israa'iil ay taambuugga u dhisaan sida Ilaah u sheegay Muuse, waxaa qolka labaad oo lloo yaqaanno qoduuska Qoduusyada soo gelaya ammaanta Ilaah.

-Ilaah wuxuu dabeeto ku amray Muuse inuu sameeyo sanduuqii Axdiga, oo la dhigayo Qolka Qoduuska Qodduusyada loo yaqaanno.

-Sanduuqaas khaas ahaaneed waxaa reer binu Israa'iil ay u yiqiinneen Sanduuqa Axdiga.

Bal aynu akhrinno Baxniintii 25:10-11

10-Oo waa inay sanduuq ka sameeyaan qori qudhac ah, oo dhererkiisuna waa inuu ahaadaa laba dhudhun iyo badh,

ballaadhkiisuna waa inuu ahaadaa dhudhun iyo badh, sarajooggiisuna waa inuu ahaadaa dhudhun iyo badh.

11-Oo waa inaad ku dahaadhaa dahab saafi ah, oo gudaha iyo dibaddaba waa inaad ka dahaadhaa, oo dushiisana waa inaad u samaysaa wax taaj oo kale ah oo dahab ah oo ku areegsan.

-Ilaah wuxuu amray in Sanduuqa Axdiga laga sameeyo geed khaas ah, waana geedak quraca.

-Ilaah wuxuu kaloo amar ku bixiyey in Sanduuqa Axdiga lagu dahaaro dahab.

-Ilaah waxaa kaloo uu amar ku bixiyey in Sanduuqa Axdiga inuu ahaado laba dhudhun iyo bar dherer ahaan, ballarkiisuna uu ahaado hal dhudhun iyo badh, sarajooggiisuna uu ahaado hal dhudhun iyo bar.

-Dabeeto, Ilaah wuxuu Muuse ku amray inuu u yeelo dabool Sanduuqa Axdiga.

Bal aynu akhrinno Baxniintii 25:17

17-Oo daboolna waa inaad uga samaysaa dahab saafi ah; laba dhudhun iyo badh waa inuu dhererkiisu ahaadaa, ballaadhkiisuna waa inuu ahaadaa dhudhun iyo badh.

-Ilaah wuxuu Muuse ku amray inuu daboolka Sanduuqa Axdiga ka sameeyo dahab saafi ah.

-Ilaah wuxuu ka loo Muuse ku amray in daboolku uu ahaado laba dhudhun iyo badh dhererkiisa, ballandhiisana waxay ahayd in laga dhigo hal dhudhun iyo badh.



-Daboolkan ayey ahayd in ammaanta Rabbigu ay ku dul fariisato marka teendhaduna ay ka dhex dhisan tahay reer binu Israa'iil.

-Dabeetana, Ilaah wuxuu ku amray Muuse inuu sameeyo laba keruubiim oo noqonaya siddada laga furo, ama laga xiro Sanduuqa.

-Keruubiimtu waa laba xayawaan oo iska soo hor-jeeda, oo weliba baalashoodiina ay fidsadeen, oo halka ugu dambaysa ay iska haystaan.

Bal aynu akhrinno Baxniintii 25:18-20

18-Oo waa inaad laba keruub ka samaysaa dahab la tumay iyagoo daboolka labadiisa madax ka soo taagan.

19-Keruub waa inaad madax ka samaysaa; Keruubka kalena waa inaad madaxa kale ka samaysaa; oo labada keruub oo labada madax ka kala taagan, iyo daboolka waa inaad isku waslad ka wada samaysaa.

20-Oo keruubiimtu waa inay baalashooda meel sare ka soo kala bixiyaan, iyagoo baalashooda ku qarinaya daboolka, oo wejiyadoodu isku soo jeedaan, oo keruubiimta wejiyadooduna waa inay ku soo jeedaan daboolka.

-Waxaa Ilaah ku amrayaa Muuse inuu sameeyo keeruub ama bahal baalal leh oo laba ah oo iska soo hor jeeda. Baalashoodana xagga dambe ayaa laysaga xirayaa.

-Mid waliba oo Keruubta ka mid ah wejiyadiisu hoos bay eegayaan.

-Dabeetana, Ilaah wuxuu Muuse ku amray, in keruubiimta ama

dusha looba dhejiyo sanduuqa si ay siddo oo kale ugu noqoto. Markii la furayo iyo markii la xirayo Sanduuqa Axdiga.

Bal aynu akhrinno Baxniintii 25:21-22

21-Oo daboolkana waa inaad sanduuqa dushiisa saartaa; oo sanduuqa gudihiisana waa inaad ku riddaa maragga aan ku siin doono.
22-Oo halkaasaan kugula kulmi doonaa, oo waxaan kaala hadli doonaa daboolka dushiisa, iyo labada keruub oo sanduuqa maragga dul saaran dhexdooda, oo waxaan kuu sheegi doonaa waxyaaalaha aan ku siin doono oo dhan oo aan amar ahaan kugu dhiibi doono reer binu Israa'iil.

-Ilaah wuxuu Muuse ku amray inuu labada loox ee tobanka amarradood ay ku qoran yihiin inuu dhex geliyo Sanuuqa Axdiga.

-Waana meel u dhexaysa labada eeruubiim ee dahabka laga sameeyey, halka Ammaanta Rabbigu ay degganaan doonto marka Ilaah dhex joogo reer binu Israa'iil.

-Waxaa kaloo Ilaah ku amray Muuse inuu sameeyo il-xidh kala qaybiyo Meesha qoduuska ah, iyo Qoduuska qoduusyada.

Bal aynu akhrinno Baxniintii 26:31 & 33

31-Oo waa inaad ilxidh ka samaysaa buluug, iyo guduud, iyo casaan, iyo maro wanaagan; hana lagu daabaco keruubiim.
33-Oo waa inaad ilxidhka ka soo lalmisaa qabsatooyinka hoostooda, oo waxaad soo gelisaa sanduuqa maragga ilxidhka gudihiisa; oo ilxidhkuna wuuxu u dhexeeyaa meesha qoduuska ah iyo meesha ugu qoduusan idinka aawadiin.



-Waa maxay macnaha loo samaynayo il-xidhka kala qaybinaya meesha Qoduuska ah iyo Qoduuska qoduusyada?

-Daaha wuxuu xusuusinayaa reer binu Israa'iil inay Ilaah kala dhaqaaqeen dembigooda awgii.

-Isla sida taambuugga uu u kala qaybinayo qoduuska qoduusyada iyo meesha qoduuska ah, ayaa dembigun a u kala qaybinayaa dadka iyo Ilaah.

-Markii daaha la dhammeeyey, wuxuu Ilaah ku amray Muuse inuu Sanduuqa Axdiga soo geliyo qoduuska qoduusyada.

-Waxaa kaloo Ilaah ku amray Muuse inuu xeero ku wareejiyo Taambuugga.

-Meel xerada dhexdeeda ah oo ka horraysa taambuugga, ayaa Ilaah wuxuu Muuse ku amray inuu sameeyo meel allabbari oo laga sameeyey Alwaax ha yeeshee lagu daraaray naxaas.

Bal aynu akhrinno Baxniintii 27:1-2

1-Oo meesha allabbariga waa inaad ku samaysaa qori qudhac ah, dhererkeedu shan dhudhun ha ahaado, ballaadhkeeduna shan dhudhun; oo meesha allabbarigu afar geesood ha ahaado, oo sarajooggeeduna saddex dhudhun ha ahaado.
2-Oo afarteeda rukun waxaad u yeeshaa afar gees; oo geesaheedu waa inaad u samaysaa weelal dambaska lagagaguro, iyo majarafadaheeda, iyo madiibadaheeda, iyo mudacyadeeda, iyo dabqaadyaasheeda, oo alaabteeda ood han waxaad u samaysaa naxaas.

-Markii qof reer binu Israa'iil ah uu dmebaabo, Ilaah wuxuu amray in qofkaasu keeno xayawaan lagu bixinayo meesha allabbariga ee naxaasta ka samaysan.

-Haatanna sida neefka allabbariga loo bixinayo ayaa laynoogu sheegayaa baalasha kitaabka.

Bal aynu akhrinno Laawiyiinta 1:4

4-Oo waa inuu gaacnta saaraa madaxa neefka qurbaanka la gubayo, oo waxaa loo aqbali doonaa inuu isaga u ahaado kafaaragud.

-Ilaah baa ku amray reer binu Israa'iil inay gacmahooda saaraan neefka ay qurbaanka u bixinayaan, iyo inay xayawaanka dilaan.

-Maxaa Ilaah u amray in reer binu Israa'iil ay gacmahooda saaraan neefka xayawaanka ah ee la gowracayo?

-Shakhsiga Israa'iiliga ah wuxuu gacantiisa saarayaa madaxa xayawaanka si ay Ilaah ugu qirtaan inay dembaabeen oo u qalbeen inay dhintaan, laakiin Ilaah wuxuu aqbalayaa dhimashada xayawaanka oo qofkuna dhiman maayo.

-Miyaa dhiigga xayawaanka  bixin karaa qaantii dembiga ee reer binu Israa'iil?

-Maya.

-Dabadeedna maxaa Ilaah u weyddiisanayaa reer binu Israa'iil inay xayawaanka u qalaan dembiyadooda?



-Ilaah wuxuu reer binu Israa'iil barayaa in ciqaabta dembigu ay tahay dhimashada.

-Maxaa Ilaah samaynayaamarkii uu arko dhiigga xayawaanka?

-Markii Ilaah arko dhiigga xayawaanka, wuxuu dib u celinayaa ciqaabtii uu saari lahaa reer binu Israa'iil ilaa Ilaah keeni doono kafaaragudka dhiigga oo ka wanaagsan kan xoolaha.

-Dabadeedna, Ilaah wuxuu Muuse ku amray in Haaruun iyo farcankiisu ay reer binu Iraa'iil ka ahaadaan wadaaddo.

Bal aynu akhrinno Baxniintii 28:1

1-Oo soo kaxayso walaalkaa Haaruun iyo wiilashiisa, oo kala soo dhex bax reer binu Israa'iil, inuu iiga adeego hawsha wadaadnimada, kuwaasu waxa weeyaan Haaruun qudhiisa iyo Naadaab, iyo Abiihuu, iyo Elecesaar, iyo Iitamaar oo wada ah wiilashii Haaruun.

-Ilaah wuxuu Haaruun iyo faraciisa ka dhigay inay noqdaan wadaaddada reer binu Israa'iil.

-Marka ay sidaas tahay Haaruun oo ahaa wadaadka sare, ayaa loo oggolaanayaa inuu galo Qoduuska qoduusyada.

-Waxaana Haaruun loo oggolaa inuu qolka loogu yeero Qoduuska Qoduusyada uu galo hal goor sannadkiiba.

-Maaddaama Ilaah qoduus yahay oo uu neceb yahay dembi, ayaa wadaadka sare oo keliya la oggolaa inuu galo qoduuska Qoduusyada hal goor sannadkiiba.

Bal anyu akhrinno Laawiyiinta 16:2

2-Oo wuxuu Muuse ku yidhi, Walaalkaa Haaruun la hadal si uusan goor walba u soo gelin meesha qoduuska ah oo ilxidhka ka shishaysa gudaheeda, oo ka soo hor jeedda daboolka sanduuqa kor saaran, yuusan dhimane, waayo anigu waxaan ka dhex muuqan doonaa daruurta kor saaran daboolka.

-Maxaa dhacaya haddii Haaruun uu soo galo Qoduuska Qoduusyada markii uu doono?

-Haaruun wuu dhimanayaa.

-Haaruun waxaa loo oggolaa inuu sannadkiiba hal mar galo qoduuska qoduusyada., waana maalintii Ilaah doortay.

-Markii maalintu ay timaaddo Ilaah wuxuu u dooranayaa haaruun inuu galo Qoduuska Qoduusyada, maxa Ilaah ku amray Haaruun inuu geeyo maalintaas qolka loogu yeero Qoduuska Qoduusyada.

Bal aynu akhrinno Laawiyiinta 16:14

14-Oo isagu waa inuu qaadaa dhiiggii dibiga qaarkiis, oo fartiisa ha kula saydhsaydho daboolka dhankiisa bari, oo daboolka hortiisana waa inuu dhiigga fartaasa kula saydhsaydhaa toddoba jeer.

-Ilaah wuxuu Haaruun ku amray inuu qaado dhiigga xayawaanka, oo uu geeyo Qoduuska Qoduusyada.

-Muxuu Aaroon ku samaynayey dhiigga xayawaanka?



-Waxay ahayd inuu ku saydhsaydho dhiigga daboolka kore ee Sanduuqa Axdiga.

-Maaddaama Ilaah qoduus yahay oo uu aad u neceb yahay dembiga ood han, ayaa wadaadka sare ay ahayd inuu dhiigga xayawaanka la galo qolka Qoduuska Qoduusyada oo uu dhiigga ku rusheeyo ama sayrsayriyo daboolka Sanduuqa Axdiga.

-Haddii Haaruun sameeyo wixii Ilaah ku amray, oo uu dhiigga ku saydhsaydhiyo dabiilka Sanduuqa Axdiga, maxaa Ilaah samaynayaa?

-Ilaah wuxuu dib u celinayaa ciqaabtii dembiga reer binu Isra'aiil ilaa iyo hal sano ilaa laga soo gaaro maalinta Ilaah bixinayo wax ka wanaagsan dhiigga xoolaha oo dembiga lagu kafaara-gudo.

-Haddaba innaga maahan kuwa u sheegaya sida aynu Ilaah ugu imanayno.

-Waa inaannu Ilaah ugu nimaadno sida uu inoo sheego ee waajibka ah inaan isaga ugu nimaadno.

-Ilaah uguma iman karno qaabkeenna ama hannaankeenna.

-Waxaannu Ilaah ugu imanaynaa hannaankiisa oo keliya.